

Xeerka dahabiga ah ee miiska cuntada:

**Qofka weyn ayaa go'aaminaya cuntada la cunayo.
Ilmaha ayaa go'aan ka gaadhi kara inta
uu rabo inuu cuno.**



Haddii ilmuhu aanu doonayn inuu wax badan cuno, waa muhiim in la ixtiraamo go'aankaas. Ha ku qasbin ilmaha inuu wax cuno. Haddii cuntada la bixiyey aysan ahayn mid soo jiidasho leh, badanaa fikrad fiican ma aha in la bixiyo midkale. Carruurtu waxay baran karaan inay jeclaadaan cuntooyinka cusub kadib marka ay cunaan dhawr jeer.

